



# Qalalaasaha Guriga ee Bulshada LGBTIQ dhexdeeda.

Australia gudaheeda, qalalaasaha qoyska iyo guriga lama aqbali doono.

Dadka isu arka inay yihiin Lesbian, Gay, Bisexual, Transgender, Intersex and Queer (LGBTIQ) waxay leeyahay xuquuq la mid ah dadka kale ee jooga gudaha Australia takoori kasta oo ku aadan waa sharci daro.

Australia gudaheeda, dhammaan hiriiradu waa siman yihiin sharciga sida waa faqdan. Tan micnaheedu waa dhammaan lammaanayaasha, oo ay ku jiraan lammaanaha isku jinsiga ah, waxay xaq u leeyihiin inay xiriir yeeshaan ama isguursadaan.

Qof waliba wuxuu u leeyahay xaq u leeyahay inuu la lahaado xiriir ammaan ah oo wanaagsan qoysaskooda, saaxiibadood iyo kuway jecel yihiin.

Qalalaasaha qoyska iyo guriga waa dembiyo sharciga ka hor imanaya. Qofka gala dembiyadan wuxuu geli karaa xabsi, haddii ay yihiin naag ama nin.

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.

Booliiska Australia waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Wixii ah macluumaad iyo tallo bixin qarsoon oo bilaasha wac 1800RESPECT **1800 737 732**.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**

## Dawlada Australia uma dulqaadato qalalaasaha qoyska iyo guriga xaalad kasta.

Qalalaasaha qoyska iyo guriga waa ku jira hanjabaada ama dabeecada loola qasdayo in lagu kontoroolo lammaanaha iyadoo lag dhalinayo cabsi ama hanjabaad ammaankooda. Qalalaasaha qoyska iyo guriga waxaa ku jira:

- wax ku dhufashada;
- ceejinta;
- u diidida lacagta lagama maarmaanka ah lammaanaha ama qoyska;
- ka takoorida lammaanaha qoyska iyo saaxiibada;
- caayida ama dhaleecaynta lammaanaha, ama
- u hanjabaada carruurta ama xayawaanka la korsado.

u hanjabaada carruurta ama xayawaanka la korsado. Qalalaasaha qoyska ama guriga ee xiriirka LGBTIQ waxaa sidoo kale ku jira:

- Ugu hanjabida xaalada xubnaha taranka oo wax ka khaldan yihiin, galmada, jinsiga, oraahda jinsiga, jinsiga bedelan ama xaalada HIV loo isticmaalo in lagu waxyeeleeyo;
- ugu hanjebida 'bannaanka'uga saasirada sayga/sayda qoyskooda, saaxiibadood, bulshada ama goobta shaqada;

- kontoroolida daawada sayga/sayda ama isticmaalida daryeelka caafiaad ee la xiriira u wareegida jinsiga kale; ama
- ku cadaadinta sayga/sayda ogolaanshaha galmo ama xeerarka jinsiga.

## Waxaa jira Australia adeegyo taageero oo ku caawin kara.

ACON waxay bixisaa macluumaad bilaash ah oo ku saabsan arimaha caafimaad ee saameynaya dadka LGBTIQ, oo ay ku jiraan qalalaasaha guriga iyo qoyska . Gal website **ACON ee ah [www.acon.org.au](http://www.acon.org.au)** wixii ah tusaha adeegyada leh taageerada LGBTIQ.

**1800RESPECT** waa adeega qaranka ee kala talinta xadgudubyada galmada, qalalaasha qoyska iyo guriga (Australia's national sexual assault, family and domestic violence counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo la talin online ka ah iyo taleefanka ah oo qarsoon bilaashna ah. La-taliyayaashu way ku dhageysan doonaan, kana jawaabi doonaan su'aalaha, waxayna kuu gudbin karaan adeegyada taageero ee kale kuna yaal xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama gal qaybta macluumaadka khaaska ah website ka LGBTIQ **1800RESPECT ah [www.1800RESPECT.org.au](http://www.1800RESPECT.org.au)**.

## Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac **Translating and Interpreting Service (TIS) 131 450**. Turjumaan ka socda TIS ayaa kaa caawin kara inaad la hadashid adeegyada kale, si kastaba ha ahaatee TIS ma bixiso la talin. Dhammaan wecitaanadu waa bilaash qarsoon oo gaar ah.